

Oggolaanshaha in la ururiyo dhiiga xudunta

Waxaan anigu/anagu helnay macluumaad af iyo qoraal ah oo ku saabsan Bangiga dhiiga xudunta Qaranka ee lagu ururiyo dhiiga ku haray mandheerta iyo xudunta ka dib dhalashada ilmahayga. Waxaan anigu/anagu ka war qabnaa xaqiiqda ah in ku deeqista dhiiga ku hara mandheerta iyo xuduntu ka dib dhalista ilmahaygu ay tahay mid aan qasab aheyn, oo aan odhan karno maya iyado sinaba u saamaynayn doonin daryeelka la siiyo aniga/anaga iyo ilmahayaga. Anigu/Annagu waxaanu sidoo kale la socdaa in aanan ka noqon karin ka dib marka dhiiga lagu deeqo, iyo in dhiiga lagu deeqay lagu kaydin doono Bangiga Dhiiga Xudunta si loogu adeegsado dadka u baahan in lagu beero/lagu talaalo dhiiga xudunta.

Aniga/Annaga waxaanu helnay macluumaad ku saabsan in dhiiga xudunta la qaadaayo 1 daqiiqo ka dib markay ka soo wareegtay dhalmada hoosta/siilka laga dhalo iyo 30 ilbiriqsi ka dib dhalmada marka ilmaha la isku soo qalo. Waxaa aniga/annaga sidoo kale nalagu wargeliyay in aanay ilmahayga wax khatar ah oo la garanaayo/la og yahay oo la xiriira ku deegista dhiiga xuduntu aanay u laheyn waxaanu helnay fursada aanu ku weydiineyno su'aalaha ku saabsan ku deeqida.

Waxa keydinta dhiiga la ururiyey khuseeya Xeerka tayada iyo heerka amaanka ee marka la maareynaayo nudaha iyo unugyada aadanaha, sharciyada Socialstyrelsen ee hawlaha nudaha qaabilsan iyo sidoo kale Xeerarka Biobank-ka. Sida waafaqsan sharciyada daryeelka caafimaadka qaranka ayaa waxa jira sir haynta natiijada tijaabada iyo xogta bukaanka. Wixii sir haynta ee macluumaadka shakhsiga khuseeya waxa loo maareynayaa sida waafaqsan sharciga ilaalinta macluumaadka (GDPR). Waxaan anigu/anagu ognahay inaanu heli karno heli karno macluumaadka ku jira diiwaanka Bangiga Dhiiga Xudunta ee qaranka ee aniga iyo ilmaheya/carruurteyda ku saabsan.

Aniga/Annaga waxaanu sidoo kale macluumaad ka helnay in haddii baaritaannada lagu sameynaayo dhiigga ilmaha iyo hooyadu aanay caadi ahayn aniga/annaga lana soo wargelin doono, si aanu taas macluumaad uga helno. Tijaabo in hooyada laga qaadaayo ayaa loo baahan doonaa, waxa marwalba jira raaxo darro marka tijaabada la iskaga qaadaayo timaada iyo sidoo kale nabarro la yeesho ka dib cirbadaha marka lagugu mudo.

Waxaan anigu/anagu halkan oggolaanshaheya/oggolaanshahayega ku siineynaa

- inaanu Bangiga Dhiiga Xudunta Qaranka ugu deeqno dhiiga ku hara mandheerta iyo xudunta ka dib marka ilmahaygu soo dhasho iyo in dhiiga ilmaha lagu keydin karo bangiga iyo raadraacista u dhaxeysa ilmaha, hooyada iyo dhiigga lagu deeqay weligeed ay jiri doonto
- in tijaabo dhiiga ah laga soo qaado hooyada si looga baaro xanuunada la is-qaadsiyo iyo si loo go'aamiyo nooca nudda, iyo in tijaabada/shaybaarka hooyada iyo ilmaha loo keydiyo iyadoo la raacayo Xeerka Biobank-ka ee wixii baaritaanada mustaqbalka ah
- inaanu bixino Cadeyn Caafimaad
- in diiwaanada caafimaad ee hooyada iyo ilmaha la baaro ilaa heerka lama-huraanka ka tahay, si loogu qiimeeyo haddii dhiiga laga soo ururiyey xuduntu ku habboon yahay in la barafeeyo oo loo isticmaalo ku talaalista/beeritaan.
- in diiwaanka ilmaha la baari karo marka Bangiga Dhiiga Xudunta la soo weydiisto in qof bukaan ah dhiiga loo isticmaalo. Taasi waa si loo hubiyo in ilmaha ay ku dhaceen xanuuno xunxun aanu dhibaato u keeni kara qofka buka.
- In macluumaadka shakhsiga ee ku saabsan ilmaha iyo qoyska ilmaha ay ahaadaan qaar qarsoodi ah oo kaliya ay heli karaan inay dib u eegaan shaqaalaha Bankiga Dhiiga Xudunta sida waafaqsan sharci dejinta Iswiidhishka ee khuseeya.



- In haddii dhiigga lagu deeqay loo diiwaangaliyo in isku ku talaalis loo isticmaali karo ay macluumaadka ku saabsan ku habboonaanta dhiigga ee ku deeqista lala wadaago diiwaannada qaranka iyo kuwa caalami ah iyo shaqaalaha kale ee ku habboon ee la xiriira isku talaalida loogu talagalay.
- in macluumaadka lagu soo gudbiyay ogolaanshan iyo soo aruurinta la diiwaan geliyo lagu keydiyo nidaamka macluumaadka shaybaarka ee Bangiga Dhiiga Xudunta

HAA MAYA

Anigu/anagu waxaanu sidoo kale halkan ku oggolaanaynaa

- in dhiiga, haddii aanu ku habooneyn in lagu keydiyo Bangiga Dhiiga Xudunta Qaranka, loo isticmaalo hubinta tayada iyo cilmi-baaris iyo in sidoo kale ay oggolaato Guddida Anshaxa Goboleedku. Taasi waxay kaliya khuseysaa cilmi-baarista halka dhammaan macluumaadka suurogalka ka dhigaaya in dib loo raadraaci karo cida dhiiga dhiibtey laga masaxo.

HAA MAYA

Göteborg taariikhda: _____

Saxeexa Masuulka:

Magaca iyo lambarka shakhsiga ee Masuulka:

Saxeexa Masuulka:

Magaca iyo lambarka shakhsiga ee Masuulka:

Saxeexa iyo magaca shaqaalaha jooga Bangiga Dhiiga Xudunta Qaranka ee oggolaanshaha qabtay:

